
# IFTIINKA - AQOONTA
## (LIGHT of EDUCATION)

—oo—

## AFFAR IYO TOBNAAD
## (FORTNIGHTLY)



WAKIILKA MAAMULA

QORAHA
Shire Jaamac Axmed

MUQDISHOW
Soomaaliya

Novembre 10 1966

## MAHADNAQ

Waaxaan aad iyo aad ugu mahadnoqayaa, intii igu kaalisay «Iftiinka-Aqoonta» oo dhan. Lacgtii ay i siiyeen na waa libin iyo hor-u-mar iyo tillaabo wanaagsan. Waxaan filayaa dadkeenna iyo dalkeenna ba in aan wax ugu qabannaa Afkayaga hooyo. Dadkii wax i siiyay, ama kuwii igu caawimay talo, kulligood waxaan leeyhay: «Waan idin ku mahdinayaa walaalayaal». La"aantiin wax ma qaban kareen!!!!

DHIGAHA

## ACKNOWLEGMENT

I have to express my thanks to all those who helped me, for their valuable contributions and suggestions concerning the following national review «Iftiinka-Aqoonta».

I still need their help. Without them I would not be able to publish this paper.

THE AUTHOR

## FARTA FURAHEEDA

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| *Dhawaaq gaaban:* | a | i | e | o | u |
| *Dhawaaq dheer:* | aa | ii | ee | oo | uu |

### XURUUFTA

| *Xarafka* | | | | *Erayga* |
|---|---|---|---|---|
| b | | — waa bir | — waa bal | — waa bad |
| t | | — waa tin | — waa tog | — waa takar |
| j | ج | — waa jiis | — waa jid | — waa jaad |
| x | ح | — waa xas | — waa xil | — waa xishood |
| kh | خ | — waa khamro | — waa khad | — waa khayr |
| d | | — waa duub | — waa dab | — waa dil |
| r | | — waa rabi | — waa run | — waa ruun |
| s | | — waa sin | — waa sun | — waa suun |
| sh | ش | — waa shan | — waa shib | — waa shir |
| dh | ط | — waa dhir | — waa dhul | — waa dhal |
| c | ع | — waa caro | — waa ceel | — waa ciil |
| g | | — waa giddi | — waa gal | — waa goob |
| f | | — waa faras | — waa fal | — waa fallaar |
| q | ق | — waa qab | — waa quud | — waa qool |
| k | ك | — waa kab | — waa kulayl | — waa koob |
| l | | — waa laan | — waa lun | — waa laba |
| m | | — waa maro | — waa maal | — waa miis |
| n | | — waa nabar | — waa nal | — waa naag |
| w | | — waa war | — waa wan | — waa wiil |
| h | | — waa hooyo | — waa hal | — waa hadal |
| y | | — waa yey | — waa yar | — waa yaanbo |
| ” | | — waa rì | — lo” | — waa la”aan |

## AQALKA

Aqalka — Qawlad — Dhul — Derbi — Albaab — Dariishad — Aqal iyo qawlad — Kor iyo hoos — Dhul iyo dhir — Albaab iyo dariishad — Aqalka — Qawladda — Korka — Derbiga — Albaabka iyo dariishada — Darrishadda — Qaladda iyo aqalka — Derbiga iyo dhulka.

---

Qawladdu waxay leedahay dhul iyo dhagax. Qawladdu waxay leedahay dhul iyo derbi iyo dhagax. Qawladdu waxay leedahay albaab iyo dariishad, ama laba dariishadood, ama saddex. Aqalka korkiisa waxaa laga sameeyaa qoryo, ama bir, ama wax kale. Derbiga waxaa laga dhisaa dhoobo iyo dhagax iyo wax kale.

---

## ISKUULKA

Iskuukla — Ardada — Kursiga — Karrasaniga — Miiska — Macallinka — Buugga — Qalinka — Qawladda — Wiilka yar — Wiilka weyn — Gabadha — Ina — Adeerkay — Walaalkay — Walaalshay — Hooyaday — Aabbahay — Saaxiibkay — Saaxiibtay — Warsame — Professoorka.

---

Anigu waxaan leeyahay aabbe iyo hooyo iyo walaalo. Ardadu waxay wax ka dhigtaan iskuulka. Anigu kursiga ayaan ku fariistaa. Warsame wuxuu leeyahay buugag wanaagsan. Macallinku wuxuu ii dhigay dersi maanta. Saaxiibkay Cali waa nin wanaagsan. Saaxiibtay Hodan waa gabadha Profossorka. Maanta qalin iyo buug baa la ii keenay. Waxaa ii keenay hooyaday iyo aabbahay. Anigu waan jecelahay hooyaday iyo aabbahay iyo walaalahay oo dhan. Waxaan doonayaa inaan wax barto.



## JIDKA

*Akhri hadalkaan:*

Jid — Dhabbe — Laami — Fidsan — Geedo — Nalal — Aqallo — Dukaan — Dukaamo — Fatuurada — Fatuurado — Jidad.

---

Jidku wuu fidsan yahay, laami na wuu leeyahay. Waa jid wanagsan. Jidku laba dhabbe ayuu leeyahay. Midu wuxuu ku yaallaa midigta, mid na wuxuu ku yaallaa bidixda. Anigu waxaan ku socdaa midka bidixda.

Markaan u socdo iskuulka, waxaan iska ilaaliyaa baabuurta. Waxaan ku arkaa jidka geedo, iyo nalal iyo dukaamo badan. Dukaamada waxaa laga gadaa alaabo badan oo kala duwan. Aabbahay wuxuu leeyahay dukaan. Shalay wuxuu ii keenay alaabo qurux-badan. Baasasku waxay maraan jidadka waaweyn. Fatuuraduhu waxay ka dheereeyaan basaska. Walaalkay wuxuu leeyahay dameer u ka fuulo aqalka, wuxuu na u fuulaa iskuulka subax walba.

---

## JIIRAR IYO YAANYUUR (bissad)

*Sheekadaan akhri:*

Jiirar — Dhis — Maalin — Godka — Ogow — Yaanyuuro — Hilibka cun — Dhawr — Xumaaday — Shir bay qabteen — Mid duq ah — Mid weyn — Iska qabo — Rag iyo naago — Sidee la isaga qabtaa? — Maqal markii ay soo socodto — Dawan u geli qorta, ama koor.

---

Waxaa la yiri waa hore. Jiirar ayaa meel degganaa. Hog ayay ka dhisteen meelshass. Maalinttii danbe, ayaa waxaa ogaaday, in jiirar ku jiraan godkaas yaanyuuro. Markaas ayay ku sugi jirtay godka afkiisa. Kii soo baxa ba way cuni jirtay. Markay yaanyuurtii cuntay dhawr, ayaa jiirarkii talo ku xumaadtaly. Maalintii danbe, ayay shir qabteen. Shirka waxaa ka soo qayb galay, mid duq ah imanayso la maqlo. Waxaase la waayey kii u gelin lahaa ba. Talo waxay ku go"day in yaanyuurta la iska qabto.

Sidee la isaga qabtaa? Duqoodii wuxuu ku teliyay, in yaanyuurta dawan (koor-bir-ah) qoorta loo geliyo; oo markii ay imanayso la maqlo. Waxaase la waayey kii u gelin lahaa dawanka qoorta, oo assagu is dhiibi lahaa.

## DHISMAHA

*Hadalladaan baro oo akhri:*

Maqal — Sheeg — geela — Miiska — Miskiinka — Diraktoorka — Xishood — Madax-weyne — Duqa — askeri — Khayr — Fandhaaalka — Macallin — Kursi.

*Tixahaan bal akhri:*

Issagu waa nin wanaagsan. Lacag i sii. Hadalka maqal. Rida ii soo lis. Xerada ood. Raadiyaha dhegayso. Baabuurka wad. Naagta wax sii. Hadalka ii sheeg. Faynuusta shid. Na sug inyar. Ina keen aan tagnee maanta. Maxaad sheegtay? See tahay? Nabad miyaa? Haa, waa nabad, illaah mahaddi. Ma shufeer baad tahay? Shaah iyo biyo iyo caano i sii. Kaffee la kaalay.

---

## HADALKAAN AKHRI

*Xassan:* Yaa yimid maanta?

*Warsame:* Waxaa yimid Cabdi.

*Xassan:* Xaggee buu ka yimid?

*Warsame:* Wuxuu ka yimid Afgooye.

*Xassam:* Goormuu yimid?

*Warsame:* Wuxuu yimid shalay.

*Xassan:* Yaa la socday?

*Warsame:* Waxaa la socday nin gaaban oo madoow.

*Xassan:* Yuu yahay ninku?

*Warsame:* Wallahi ma aqaan, waxaan se u malaynayaa, inuu yahay saaxiibki.

*Xassan:* Ninku magiciis?

*Warsame:* Ma aqaan.

*Xassan:* Waxaan u malaynayaa, inuu yahay walaalkiis.



## NIN, NIN U FAANAY

Waxaa la yiri. Nin baa nin u faanay. Wuxuu ku yiri. Wallaahay, inaan cirka kugu soo dumin!! Markaasaa ninkii kale ku yiri. Haddaad cirka soo dumisid, meelshii aad ka galshid, ayaan anna ka gelin!!

---

## MAHMAADAAN BARO

1. — Nin qorrax kugu dilay, hoos kuuma jiido.
2. — Deriskaa mar ku diin, marna ku dayo, marna ka dar.
3. — Qaylo gar dhaweysey.
4. — Baryo badan iyo bugto badan ba, waa laysku nacaa.
5. — Gari laba nin, kama wada qosliso.
6. — Inta dhogortaadu dhan tahaa, la dhawrsadaa.
7. — Ayax teg, eel na reeb.
8. — Wixii nin xil moodaa, ninkale xarrago moodaa.

---

## NASSIIB-XUMO

*Waxaa la yiri:*

Nin ayaa dhaan raray, dhaankii ayuu kexeeyey. Ceel buu geeyey, wuu ka soo dhaanshay. Markaas ayuu awrtii isku soo xariiriyey. Kolkuu dhex marayey, ayaa lix rati, ka hartay. Awrtuna waxay ahayd laba iyo toban rati. Markuu tebey, ayuu wuxuu ku noqday raadkiisii. Markaasaa wuxuu u yimid lixdii rati, oo lix libaax kala cunayso. Markaas ayuu inta sibraarkiisii iska qaadtay, kusoo noqday lixdii rati oo kale. Markaasuu haddana wuxuu u yimid lixdii rati oo kale, oo lix libaax kala cunayso. Laba iyo tobankii rati, oo dhaanka ahaa, waxaa ka cunay libaaxyo. Gurigiisii ayuu yimid assagoo fara-maran. Haddana wuxuu u yimid ciddiisii oo la dhacay. «Ayaan-darro fac-weynaa».

## DHISMAHA AFKA (Somali grammar)

| | |
|---|---|
| Anigu | Annagu ama |
| Adigu | Annaku |
| Issagu | Idinku |
| Iyadu | Iyagu |

## WAX KU DAR HADALLADAAN, OO DHAMMAYSTIR

1. — Anigu waan ——— Afgooye maanta.
2. — Adigu waxaad tahay ———
3. — Issagu waa ——— wanaagsan.
4. — Iyadu waxay tahay naag ———
5. — Annagu waxaan nahay ——— yaryar.
6. — Idinku waxaad ——— Hargeysa shalay.
7. — Iyagu waxay yihiin niman ———
8. — Adigu la kaalay ——— iyo shaah.

## MARKALE HADALLADAAN AKHRI, BAL ISKU DAY

*Cabdi:* War Cabdi! Bal iska warran?
*Cali:* Waa nabad. See tahay? Goormaad timid?
*Cabdi:* Waxaan imid hadda. Baabuur baan la socdey.
*Cali:* Ma soo marteen Kismaayo?
*Cabdi:* Haa, waxaan soo marnay shalay.
*Cali:* Baabuurka yaa waday?
*Cabdi:* Waxaa waday shufeer.
*Cali:* Shufeerku waa kee?
*Cabdi:* Ma aqaan. waa mid dheer.
*Cali:* Mid dheer!!! Sow magac ma le?
*Cabdi:* Wallaahi, magaciisa ma aqaan. Waa mid dheer!
*Cali:* War sidee tahay? Miyaadan aqoon shufeerka. Ma doqon baad tahay?
*Cabdi:* Maya, doqon ma ahi, bal aan xusuusto. Sug.... Sug.... Haa, haddaan gartay. waa Xusseen!!!!
*Cali:* Waa ninkaan rabay. Aan gaaro intuusan iga tegin. Nabad gelyo?
*Cabdi:* Nabad gelyo, waan is arki doonnaa mar kale, nabad gelyo.



## SHEEKADAAN AKHRI
## WAA YAAB

*Waxaa la yiri:*

Nin indha la", ayaa dudumo hoos fariistay. Waxaa na ninka indhaha la" la socday, ninkale. Markaas ayaa ninkii indhaha la"aa dudumadii taabtay, oo ku yiri saaxiibki. War horta, yaa dudumo sameeyey? Markaasaa ninkii ku yiri. Waxaa sameeyey aboor. Markaasaa ninkii indhaha la"aa yiri: Oo muxuu ku sameeyaa aboorku? Markaasaa saaxiibkiis yiri: Wuxuu ku sameeyaa calyadiisa habeykii!

Ninkii indhaha la"aa wuxuu yiri, assagoo yaabban.

«Hal waa yaab».

«Hal kalena waa yaabka yaabki».

«Hal na waa amankaag».

«Markaasaa ninkii kale ku yiri" Kow».

*Ninkii indhaha la"aa wuxuu yiri:*

«Hal waa yaab, oo dudumada intaas le"eg, aboor baa sameeya waa yaab».

«Hal na waa yaabka yaabki, oo habeynkii buu sameeyaa waa yaabka yaabki».

«Hal na waa amankaag, oo calyadiisuu ku sameeyaa waa amankaag».

## SALAANTA (nabdaadiga)

*Akhri salaantaan:*

Ma nabad baa?
ama
Nabad miyaa?

Waa nabad
ama
Nabad weeye

Iska warran?

Waa nabad, nabad weeye

Maxaad sheegtay?

Nabad baan sheegay

Ilaah mahaddiis

Waan iska ladnahay

Ma ladan tahay?

Haa,waan fayoobahay, waan ladnahay

Ma barideen?

Haa, waan barinay

Subax wanaagsan?

Subax wanaagsan

See tahay?
ama
Sidee tahay?

Waan nabad qabaa,Eebbe mahaddiis



## KALA TAGGA

Soo bari
Soo bari
Tu san
Tu san
Nabad gelyo
Nabad gelyo
Waan is arki doonnaa mar kale
Haye, waan is arki doonnaa
ama
Waa hagaag, markale baan is arki doonnaa.
Nabadey!
Nabadey!
Ilaahay ha ku nabad yeelo
Ilaahay ha ku nabad yeelo

---

## WEYDIINTA DADKA IYO DUUNYADA BA IYO WAX KALE

*Kursi:* Waxaani waa maxay?
Waxaasi waa kursi

*Kursi:* Waxaasi waa maxay?
Waxaasi waa kursi
Waxaani kursi miyaa?
Haa, waxaani waa kursi
Ma kursi baa waxaasi?
Haa, waxaasi waa kursi
Maya, kursi ma aha waxaasi
Waxaasi waa wiil

*Qalin:* Waxaani ma qalin baa?
Haa, waxaani waa qalin
Maya, waxaani qalin ma aha

*Will:* Waxaani ma will baa?
Haa, waxaani waa will
Maya, waxaani wiil ma aha

*Gabadh:* Waxaasi ma gabadh baa?
Haa, waxaasi waa gabadh

## HADALKAAN AKHRI

| | |
|---|---|
| *Nuur:* | Magacaa adigu? |
| *Cabdi:* | Magacaygu waa Cabdi. |
| *Nuur:* | War ma Cabdi baa ninkaanu? |
| *Cabdi:* | Haa, waa Cabdi, waa laftiisii (qudhiisii)!!! |
| *Nuur:* | Cabdi!! Ma nabad baa? |
| *Cabdi:* | Waa nabad. Waan faayaa. Waan iska nabdoonahay. |
| *Nuur:* | Adna, bal iska warran? |
| *Cabdi:* | Waa nabad, mahadsanid. |
| *Nuur:* | Kaalay, aan fariisannee baarkaan. Aan shaah iyo kaffee cabno. |
| *Cabdi:* | Waa hagaag (waa yahay). |
| *Nuur:* | Duqa!! Keen (la kaalay) shaah iyo caano. |
| *Wiilka:* | Waa yahay. Inyar i suga. Haddiiba waan keenayaa. |
| *Cabdi:* | Mahadsanid shaaha aad iga bixisay. |
| *Nuur:* | Wax ba ma aha. |
| *Cabdi:* | Waan tegayaa, iga raalli ahow. Mahadsanid markale baan is arki doonnaa. |
| *Nuur:* | Adaa mudan. |



## WAQTIGA (Goorta)

*Waqtigaanu waa waqtigee?*

1. — Waa waqtigii kulaylka
2. — Waa waqtigii roobka
3. — Waa waqtigii hurdada
4. — Waa waqtigii shuqulka
5. — Waa waqtigii cuntada
6. — Waa waqtigii cabbidda
7. — Waa waqtigii qabawga
8. — Waa waqtigii akhriska
9. — Waa waqtigii fassaxa
10. — Waa waqtigii dersiga
11. — Waa waqtigii cayaarta
12. — Waa waqtigii barashada
13. — Waa waqtigii abaarta
14. — Waa waqtigii qoridda.

---

## MAALMAHA TODDOBAADKA

| | |
|---|---|
| Maalintee | Maanta waa maalintee?<br>ama<br>Maalintu waa maalintee? |
| Axad | Maanta waa axad |
| Isniin | Maanta waa Isniin |
| Talaada | Maanta waa Talaada (Salaasa) |
| Arbaca | Maanta waa Arbaca |
| Khamiis | Maanta waa Khamiis |
| Jamce | Maanta waa Jamce (jimce) |
| Sabti | Maanta waa Sabti |

## HADDA TIXO WAAD KA SAMAYN KARTAA MAALMAHA TODDOBAADKA

| | |
|---|---|
| Axad | Xaafiiska iigu kaalay Axadda |
| Talaadada | Ii imow Talaadada |
| Khamiista | Nagu sug xaafiiska Khamiista |
| Jamcaha | Jamcuhu waa iid, waxaan tegaynnaa Afgooye |
| Axaddu | Axaddu waa iid, waan ku cayaari doonna kubbad |
| Isniinta | Na tus magaalada Isniinta dhow |
| Arbacada | Waxay ardadu aadaysaa Hargeysa Arbacada danbe. |

---

## G A B A Y

Ra"yi-xumo waxaa looga tegay, runi hadday jooto
waa nimaan ku rabin, kaana raba inaad u roonaadto.

---

## O R G I

*Waxaa la yiri:*

Nin Cigaal Barre la yiraahdo, ayaa wuxuu lahaa orgi caadto ah. Cigaal orgigii ayuu koriyey. Dhawr bilood haddii la joogay, ayuu orgigii cayilay. Markaasaa Cigaal orgigii jeclaaday. Orgigu markuu Cigaal arko, ayuu ku soo roori jiray. Maxaa yeelay wuu u roonaa. Maalintii danbe, ayuu wuxuu Cigaal maqlay qaylo, markaas ayuu dhugtay. Wuxuu arkay naagtiisii oo sii wadda orgigii. Naagtu waxay rabtay, inay qalato orgiga. Markaas ayuu naagtiisii inta ka daba tegey ka soo reebay orgigii. Gabay wuxuu ku yiri:

Orgiyohow abeesuhu haddaan erayo kuu sheego
Caqli laawe ma ihide, haddaan waano ku iraahdo
Abda ma laha, naag ina gumeed nimay ag joogtaaye
Waagii iftiima ba dab bay ololinaysaaye
Eraygeeda keliyaa ka daran umulka naareede
Arigii dhammaa, waxaa ka haray adiyo dhawr neefe
Agteeda uga durug yey mindida ku ogolaysiine



## WAA XAAL ADDUUN

*Waxaa la yiri:*

Nin ayaa safray, meel fog ayuu u socday. Maalmo badan ayuusan wax cunin. Maxaa yeelay dhulku cunto ma lahayn. Maalintii danbe assagoo meel socda, ayuu wuxuu arkay daanyeer daba-guduudan oo meel maraya galabtii. Markaasaa ninkii wuxuu mooday, in daanyeerku hilib dabada ku sidto. Ninku na weligi ma arag daanyeer. Markaasuu wuxuu yiri: Bal niman yohow! xaalka dunidaas fiiriya!!! Aniguna hilib baan waayey, ninkaasi na (daanyeer) dabada ayuu ku sidtaa hilib.

Somaalidu waxay tiraahdaa. «Hilib waa nin waayey iyo nin futada ku sidta».

DHIGMADA IYO FAAFINTA

Tel. 3009 Sanduuqa 388

SHIRKADA SANDAI

| | | |
|---|---|---|
| Gudaha: | | Sh. So. 15 |
| Dibadda: | (badda) | » » 20 |
| | (dayuuradda) | » » 60 |
| Qiimaha: | | Sh. So. 1 |

MUQDISHOW

Jamhuuriyadda (Somalida)



(23 luglio 1992)